# AQOON-IS-WEYDAARSI LOOGA DOODAYO SIYAASADDA QARAN EE ADEEGGA SAADAASHA IYO KORMEERKA BIYAHA

**AGOOSTO, 2022**

# WAR SAAXAFADEED

Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha ee Xukuumadda Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa guul muhiim ah ka gaartay in muddo sodon sano ah kadib ah markii ugu horreysay la soo saaro Siyaasadda Qaran ee Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ee Soomaaliya iyo qorshe-fulineedka hirgelinta siyaasadda. Wasaaraddu waxay qabatay kulan looga doodadayo siyaasadda si loo ansixiniyo tiirarka, hababka iyo istraatiijiyadda ay ku taagan tahay siyaasadda Qaran ee Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha 26 iyo 27di Agoosto, 2022. Aqoon-is-weydaarsigan ayaa isku keenay siyaasad-dejiyeyaal iyo hawl-wadeenno kala duwan si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan qabyo-qoraalka koowaad ee siyaasadda. Ka qayb galeyaasha ayaa ka kala yimid Hay'adaha dawladda, qeybaha kala duwan ee bulshada, Hay'adaha gaarka loo leeyahay, Deeqbixiyayaal, Qaramada midoobe iyo Hayadaha samafalka ka shaqeeya taas oo ah mid si weyn uga tarjumaysa wada shaqeynta hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka ah. Wafdiga ka soo qeyb galay waxaa ka mid ahaa wakiillo ka kala socday wasaaradaha Federaalka iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka, UNDP, UNICEF, FAO, SWALIM, SWEDEN, aqoonyahanno iyo hay'ado aan dowli aheyn. Wasaaradaha dawladda faderaalka ee shirkan ka qeyb galay ayaa waxaa ka mid ahaa: Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka, Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka, Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, iyo Agaasinka Deegaanka.

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay hiigsanaysaa in ay yeelato siyaasad Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha oo shaqaynaysa dawladduna ay hoggaaminayso, taas oo awood u siinaysa dawladda dhexe in ay aqoonsato doorka cimillada iyo biyaha ku leeyihiin bulshada iyo muhiimadda xogta saadaasha iyo kormeerka biyaha. Sidoo kale siyaasadan ayaa la doonayaa in lagu hago hab fikirka kooxaha ka shaqeeya arrimaha saadaasha iyo kormeerka biyaha iyadoo laga eegayo hababka ururinta iyo bixinta xogta iyo adeeggyada la xiriira saadasha hawada iyo kormeerka biyaha. Waxaa sidoo kale

siyaasaddu xoogga saareysaa sidii lagu heli lahaa nidaam lagu hagi karo bixinta adeegyada saadaasha iyo kormeerka biyaha iyo silsilad hawleedka hoos yimaada.

Furitaankii aqoon-is-weydaarsiga waxaa ka hadlay **Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha Mudane Abdirizack Mohamed** oo sheegay in siyaasadda Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ay udub dhexaad u tahay in Soomaaliya laga hirgeliyo adeegyada saadaasha iyo kormeerka biyaha si loo gaarsiiyo dalka oo dhan xog lagu kalsoonaan karo oo waqtigeeda la joogo. Adeegyada biyaha iyo saadaasha hawada ee tayada sare leh iyo hababka digniinta hordhaca ah waxay kor u qaadaan adkeysiga cimilada. Wuxuu sidoo kale ka dhawaajiyey in siyaasaddu ay udub dhexaad u tahay fulinta Istaraatiijiyadda Qaran ee Kheyraadka Biyaha Qaran oo xooga saaraysaa horumarinta awooda hay'adaha si loo yareeyo khatarta isbedelka cimillada iyo xoojinta hab-nololeedka qeybaha nugul ee bulshada.

**Agaasimaha Waaxda Maareynta Khatarta Masiibooyinka ee Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka, Mudane Khadar Ahmed,** ayaa sidoo kale carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay siyaasadda Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha, wuxuuna yiri, "Horumarinta siyaasadda Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha iyo isku-dhafida labada eray ee 'Kormeerka Biyaha' iyo 'Saadaasha Hawada' waxay ahaayeen arrin soo bilaabmatay sannado badan ka hor." Samaynta hannaan isku dubaridan ee koox howleedka Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ee wasaaradaha ayaa sameeyay tallaabadii ugu horreysay ee horumarinta siyaasadda. Siyaasaddani waxay u shaqayn doontaa sidii ay u noqon lahayd udubka koox howleedka ee Adeega Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha, waxayna xoojinaysaa waxtarka nidaamka digniinta hordhaca ah ama ugu horayso ee khataraha, waxayna hagaajin doontaa nidaamka bixinta digniinta hordhaca ah. Agaasimuhu wuxuu sheegay in uu kalsooni ku qabo in siyaasaddu ay gacan ka geysan doonto hagaajinta tayada xogta ee hawlaha la xiriira.

Dhinaca kale, Agaasimaha Waaxda Waraabka iyo Saadaasha Hawada ee Beeraha ee Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka, Mudane Eng. Gurey, ayaa u arkay siyaasaddan mid lagama maarmaan u ah horumarinta Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ee dalka, isla markaana ay tahay siyaasadda hooyada u ah horumarinta Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ee dalka. Waxa uu u mahad celiyay hay'adaha iyo saaxiibada kala duwan ee muddada dheer ka shaqaynayay hawshan waxtarka u leh dalka. Ugu dambeyn, wuxuu bogaadiyay shaqada iyo isku-dubbaridka wax-ku-oolka ah ee ay koox howleedka Adeega Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ku soo bandhigtay siyaasaddan qaran ee dowlada hormuudka ka tahay ee lagu horumarinayo adeegyada cimillada iyo biyaha Soomaaliya.

Isagoo ku hadlaya magaca Hayadaha Caalamiga ah, **Mudane Abdulqadir Rafiq**, Maareeyaha barnaamijka Adkaydsiga iyo Isbeddelka Cimillada ee UNDP Soomaaliya ayaa ku nuuxnuuxsaday muhiimadda ay siyaasaddu u leedahay Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ee Qaranka marka loo eego jahawareerka cimillada iyo masiibooyinka kale ee saameeyey Soomaaliya. Wuxuu intaa ku daray in Siyaasaddu muhiim u tahay hagida hababka ay Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Saaxiibadeed uga gaari lahaayeen go'aanno xog-ogaal ah oo wax looga qabto xaaladaha cimillada iyo kor u qaadida ladnaanta iyo koritaanka bulshada.

Horumarinta siyaasaddan waxay u tahay waqti muhiim u ah Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) si ay u bixiso jiheynta siyaasadda bulshadu aadka ugu baahan tahay ee ku aaddan bixinta Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ee Soomaaliya ee hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Ugu dambeyntii, siyaasaddani waxay noqon doontaa aas-aaska sharciga iyo qorshayaasha Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha ee mustaqbalka; Sidaa darteed, waxa lama huraan ah in siyaasaddani, gaar ahaan soo bandhiggeeda u horreeya, uu noqdo mid fadhiya oo dhammeystiran. Dawladdu waxay kaashanaysaa Hay'adaha Qaramada Midoobay ee UNDP iyo UNICEF si loo horumariyo nidaamka Adeegga Saadaasha iyo Kormeerka Biyaha Soomaaliya.

******DHAMMAAD******